2020-08-15

# GEEDDI SOCODKA DOWLAD DHISKA & DEMOQARADIYEENTA SOOMAALIYA

## Dib u eegista iyo u diyaar garowga doorashada Soomaliya 20/21




**Somali Peninsula Research Centre**

[SPR CENTER]

**Adresss:**

laxfiskvägen 30,

433 38, Partille

Info@sprcenter.org

www.sprcenter.org

# Shaxda Tusmadda

**Horudhac** .......... **2**

**Maxaa dhici kara haddii doorasho dib u dhacdo** .......... 3

**Kaalinta dowladda dhexe iyo dowlad goballeedyadu ku leeyihiin doorashada** .......... 3

**Kaalinta bulshada caalamku ku leedahay doorashada** .......... **4**

**Matalaada gobalka Banaadir iyo meel marinta maqaamka Muqdishu** .......... 5

**Nuuca doorashada iyo habraaceeda** .......... **6**

Kaalinta xisbiyadda .......... 6.7

Kaalinta Guddiga Madaxabanaan ee Doorashooyinka Qaranka .......... 6.8

Habraaca guud iyo shaxda doorashada 2020/2021

SOMALI PENINSULA RESEARCH CENTER

SPR CENTER

# Horudhac

In kabadan labbatan sanno ay bulshada calaamku dadaal ugu jirtay nabaddeynta iyo dowlad u dhiska Soomaaliya, ma jirin dowlad ka dhalatay geeddi socodka nabadda oo aqoonsi buuxa ka heeshay guud ahaan shacabka Soomaaliyeed. Haddana,waxa kaliya ay Soomaalidu ku guuleysatay tobbaneeyadi sanno ee la soo dhaafay ayaa aheyd in awoodda si nabadda la iskugu wareejiyo. Eebbe ka sokow mahaddi haka gaarto xeerka gunta dheer ee Soomaalida oo had iyo jeer ku saleysan garowshiyaha waxa kasta oo geedka hoostiisa guurtidu ku gaarto. Waa xeerka iyo hab dhaqanka Soomaalida kaga qoray bugga kowaad taariikhda demoqaradiyada Afrika iyo in ay noqdeen dalki ugu horeeyay Afrika ka dhacdo in talada si demoqaraadiya oo nabadda la isku wareejiyo.

Waxaa intaadheer, in Soomaalidu dhaqan ahaan tahay bulsho ay aad ugu weyn tahay madaxbanaanida iyo sinaanta qofeed iyo garowsiga marka qofka looga gar helo golaha guud. Nasiib daro, dhaqankaasi fursad uma helin in la sii horumariyo oo laga dhaqan galiyo nidaamka dowladeed ee Soomaalidu qaateen 1960ki. Waxaa rajada hor istaagay nidamki kalitaliska ee qaatay nidaam siyaasadeed ku dhisan mabad'ida shuuciyadda iyo nidaamkeedi dhaqaale ee hantiwadaaga, kaas oo lid ku ahaa hab dhaqanka iyo hab dhsimeedka dhaqan-dhaqaale ee Soomaalida.

Dhanka kale, dhibaatada ugu weyn ee heysata geeddi socodka nabadda iyo dowlad dhiska Soomaaliya tabankii sanno ee la soo dhaafay waa fikradda ah *'guuleystaha ayaa wada qaata.'* oo waxaa dhaqan noqday in kooxda ku guuleysata hogaan sare ee dalka ay talada la gaar noqoto. Islmarkana ay ka qeyb noqoshada siyaasadda iyo talada dalka kahoraan dadka intooda kale. Waana midda had iyo jeer adkeyneysa in dalku gaaro xasilloonida siyaasadeed. Sida awgeed, hanaan kasta oo dib loogu yegleelayo nabadda iyo dowladnimada Soomaaliya, waa in u helaa qaab lagu gaari karo heshiis siyaasadeed oo ku saleysan wadar-ogol iyo siyaasad loo dhan yahay.

Haddaba, nidaamka doorashadu waa tiir udub dhexaad u ah demoqaradiyada waayo, waa waxa kaliya ee isku xira muwaadiniinta iyo wakiiladooda. Si taa la mid ah, nidaamka doorashadu waa mid aad muhiim ugu ah bulshada ismariwaaga iyo kala qaybsanaanta diinta, qowmiyadda/qabiilka iyo afku u hareeyay nidamkooda siyaasada. Waayo waxay ka caawineysaa dhisida nidaam dowliya oo si hufan uga shaqeyn kara horumarinta wada noolashaha bulshada, xiriirka iyo kalsoonida ay ku qabbaan dowladnimada.
Waxaa jira dhowr arrimood oo keeni kara rabshado la xiriira doorashooyinka, kuwaa oo dhici kara marxalado kala duwan inta lagu guda jiro xilliga doorashada. Sida hanaanka doorashada iyo siyaasada oo loo dhameyn, ku tagrifalka awooda, xukun maroorsi iyo doorashada oo lagu shubto. Wax ka qabadka arrimahaasi waxaa ay ku xiran yihiin qaadashada talaabooyin ku habboon iyo sida loo maareyo geeddi socodka doorashada.

SOMALI PENINSULA RESEARCH CENTER

Indheergaradka iyo aqoonyahanada culuumta bulshada iyo siyaasadda waxaa ay qabbaan in doorashadu horseedin rabshadaha ka dhaca dalalka, balse ay tahay geeddo socod siyaasadeed oo kicin kara amma sii xumeyn kara ismariwaa iyo colaado horey u jiray, haddii aan si hufan loo maareyn. Haddaba, isku day kasta oo lagu maareynayo habsami u socodka doorashooyinka ka dhaca dowladdaha nugul iyo dalalka ay saameeyeen colaadaha iyo ismariwaaga daba dheeraday. Waa in aasaas looga dhigu fahamka iyo dib u eegista casharadi laga bartay kuwa la midka ah. Sida oo kale, waa in si qotodheer oo taxadar leh loogu kuurgalo sida dowladdu u maareneyso doorashooyinka qaran iyo sida jilayaasha caalamiga ahi iyo daneeyasha dibbaddu ula falgalaan geeddi socodka doorashooyinka si taban ama togan.

Warbixintani waxay soo bandhigeysaa aragtiyo cusub oo isku dhafan, kuwaas oo ka dhigeya dowlad dhiska iyo dimoqaradiyeenta Soomaaliya udub dhexaad u yahay xal u helista nidamka siyaasadeed aan dagneyn iyo qoondeynta awood qeybsiga.Sida oo kale,warbixinto waxay isku dayi doontaa soo jeedinta qaabab lagu fahmi karo horumarka laga sameeyay geedi socodka dowlad dhiska iyo nabadeynteeda Soomaaliya. Islamarkana ay soo bandhigeysaa talooyin wax ku ool ah ay saamileyda siyaasada iyo jiliyaasha caalamiga ah ee daneeya siyaasadda Soomaaliya ku maareyn karaan caqabadaha hortaagan doorashada, si looga hortago qalalaase siyaasadeed iyo dib u dhac ku yimaada geedi socodka dowlad dhiska iyo demoqaradiyeenta Soomaaliya. Warbixintu waxaa ay diiraddda saareysaa diraasada shan u jeedo oo gogoldhig u ah doodaha laxariira doorashada Soomaaliya

- **I. Maxaa dhici kara haddii doorashadu dib uga dhacdo waqtigeeda?**
- **II. Kaalinta dowladda dhexe iyo dowlad goballeedyadu ku leeyihiin doorashada.**
- **III. Kaalinta bulshada caalamku ku leedahay doorashooada.**
- **IV. Matalaada gobalka Banaadir iyo meel-meerinta maqaamka caasimadda.**
- **V. Nuuca doorashada ee dalka dhici karta iyo habraaceeda.**

## MAXAA DHICI KARA HADDII DOORASHADU DIB UGA DHACDO WAQTIGEEDA?

Soomaaliya waa dal aan hey'addaha dowladdu laheyn mug weyn ay ku meelmariyaan hawlaha loo igmaday. Waxaa ay si adag aan xasilneyn isku meel uga jiraan awooddo maxalliya sida: dowlad goballeedyo u shaqeeyo si madaxbanaan loolana ku ah dowlad dhexe, beelo, urur diimeedyo, kooxo argagixiso ah iyo faragalin shisheeye oo uga imaaneysa dalal dano isdiidan ka leh. Kuwaas oo caqabad weyn iyo loolan adag ku ah geeddi socodka nabadeynta iyo dowlad dhiska Soomaaliya. sidaa darteed, mar kasta waxaa taagan ismariwaa iyo hardan siyaasadeed oo ku saleysan sida heshiis bulsho looga gaari lahaa ka qeyb galka siyaasadda iyo awood qeybsiga.

Dowladihii talada dalka isku soo badbadalay waxaa ay dalka ka sameeyeen xoogaa horumar ah balse, midna kuma guuleysan dhisida tiirarka aasaaska u ah haykal dowladnimada, haddii ay noqon laheyd dhameystirka dastuurka dalka, dhisida maxkamad dastuuri ah, meel marinta maqaamka caasimada iyo maamul u sameynteeda iyo ka hirgalinta dalka doorasho guud oo qof iyo cod ah. Siday ahaataba, tan iyo markii lagu soo aasaasay dowladdii TNG Caarta sanadki 2000, waxa kaliya ay Soomaalidu ku guuleysatay waxay aheyd in awoodda la isku wareejiyo si nabad ah, waana sunno wanaagsan oo mudan in la dhowro, horayna loo sii qaado.

Sida darteed, waxaa laga maarmaan ah in hogaamiyaasha siyaasaddu gartaan nugulnaanta nabadda iyo dowlad dhiska Soomaaliya, casharna laga qaato rabshadaha iyo kala qeybsanaanta ka dhasha doorashooyinka dalalka ay khilaafadka iyo dagaalada ahliga ahi ay saameeyen. Taa oo muhiim u ah in doorasho la wada ogol yahay iyo xil wareejin nabadda ay ka dhacdo dalka, islamarkan laga fogaado qalalaase siyaasadeed iyo dib u dhac ku yimaada kalsoonida iyo xariirka ka dhaxeeya bulshada iyo dowladda. Xilligaan adagna aan dalka iyo dadka loo horseedin khilaaf iyo hardan siyaasadeed oo dib u dhac u keeni kara horumarka koobaan ee la gaaray.

## KAALINTA DOWLADDA DHEXE IYO DOWLAD GOBALLEEDYADU KU LEEYIHIIN DOORASHADA

Soomaaliya waxaa si rasmi ah loogu aqoonsaday jamhuuriyad federaal ah sanadki 2012, kadib markii dastuurka cusub ee ku meel gaarka ah la ansixiyay. Dastuurka KMG ee DFS wuxuu qeexayaa baaqa Jamhuuriydda Federalka Soomaaliya iyo xiriirka ka dhexeeya dowladda dhexe iyo dowlad goballeedyada xubinta ka ah balse, si cad uma qeexna kaalinta iyo mas'uuliyadaha heer kastaahi leeyahay .

Awood qeybsiga dowladda dhexe iyo dowlad goballeeyada xubinta ha dowlada federalka ah waa mid ku qeexan qodobka 54-aad ee dastuurka KMG ah*: " Awood-qaybsiga siyaasadeed iyo dhaqaale waxaa ka wada xaajoon doona Dawladda Federaalka iyo Dawladaha ka mid noqonaya Dawladda Federaalka Soomaaliya marka laga reebo: A) Arrimaha Dibadda; B) Difaaca Qaranka; C)Jinsiyadda iyo Socdaalka iyo Siyaasadda Lacagta, oo ay awooddeeda iyo mas'uuliyaddeeda yeelaneyso dowladda federaalka. "*

Dhanka kale, dastuurka KMG ah waxuu qeexayaa in dowladda federalka ah iyo dowladdaha xubinta ka ahi ay yeeshaan wadashaqeyn dhow iyo xiriir joogto sida ku qeexan qodobka 50-*aad " Heer kasta oo Dawladeed ha ahaadeen heerar siman ama kuwo kala sarreeya waa in ay yeeshaan xiriir iskaashi oo wanaagsan."* Taa baddelkeeda, ma jiro xiriir iyo wadashaqeyn wanaagsan oo u dhaxeyay dowladda dhexe iyo dowlad goballeedyada seddexdi sanno ee ugu dambeysay. Sidaa darteed, Xiriirka iyo wadashaqeyn la'aanta ka dhaxeysa dowladda dhexe iyo dowladda goballeedyadu waxaa ay ragaadiyeen horumarki laga gaari lahaa xasillinta dalka iyo horumarinta kaabayasha aasaaska u ah dowladnimada.

Intabadan hardanka iyo wadashaqeyn la'aanta DFS iyo dowlad goballeedyada waa mid ka dhashay is aminaad la'aan iyo khilaafaad ku saleysan awood qeybsiga. Isla mar ahaantana ay jirin dulqaad iyo tanasul hogaaneed oo ku aadan khilaafaadka madama nidaamka siyaasadda dalka ku dhisan tayahay heyb iyo is kooxeysi. Waana midda keentay in aan wax horumar ah oo la taaban karo laga gaarin wada hadalladda iyo heshiishyadda ay galaan dhinacyada isku haaya awoodda dalka.

Haddaba xilligga kala guurka ah ee dalku galay ee doorashooyinka loo diyaar garoowayo, waxaa soo ifbaxa khilaafaad cusub iyo is jiid jiid hor leh oo ku saleysan doorashada iyo qoondeynta awoodda. Sida oo kale, waxaa soo baxa nugulanaanta heerarka kala duwan ee hey'addaha dowladda iyo hardanka dhexdooda ah madama, mid walba doonayo in u ku yeesho saameyn mug leh maamulka doorashada iyo qoondeynta awoodda xilliga kala guurka ah. Waxaa bilihi ugu dambeeyay soo baxay kala aragti duwanaashaha hey'addaha dowladda haddii ay ahaan lahaayeen fulinta iyo sharci dajinta. Tusaale, kala aragti duwanaansho salka ku heysa damac siyasaadeed iyo loolan xagga awoodda ah oo dhaxeysay hey'adda fulinta ayaa keentay in si fudud meesha looga saaro xukummadi u hogaaminayay Raysul-wasaare Xasan Ali Kheyre. Waxaa iyada loolaan xagga awoodda ah u dhaxeeyaa labbadda aqal ee Barlamanka Soomaaliya.

Siday ahaataba, nidaamka siyaasadeed ee ugu weyn geeddi socodka nabadda iyo dowlad dhiska Soomaaliya waa qabashada doorashooyinka. Waayo, waaa habka ugu muhiimsan ay dhalan karto kalsoonida lagu qabo awood qeybsiga siyaasadda. Sida awgeed, waxaa xiriir iyo wadashaqeyn dhex marta dowladda dhaxe iyo dowlad goballeedyada xilligaan kala guurka laf dhabar u tahay qabsoomida doorasho ka hirgasha dalka.

# KAALINTA BULSHADA CAALAMKU KU LEEDAHAY DOORASHOOYINKA SOOMAALIYA

Kaalinta bulshada caalaamka iyo xariirkeeda Soomaaliya waxuu soo maray heerar kala duwan oo sameyn togan iyo mid tabanba ku leh Soomaaliya. Kadib markii meesha ay kabaxday dowladi dhexe ee Soomaaliya 1991. Waxaa dalka idilkiis ku baahaya dagaalo sukeeye oo sababay macluul aad u xun ayaa Golaha Ammaanka ee Qarammadda Midoobay soo saaray qaraar ah in bulshada caalamku faragalin ku sameyso xaaladda bani-adanimo ee ka taagan Soomaaliya. Waxaa markii ugu horeysay la qaaday hawl galkii loogu magac daray " Hawl galka Raja soo Celinta" una hogaaminayay Mareykanka balse waxa guul ah lagama gaarin. Waxaa xigay shirar kala duwan ay dowladdaha dariska oo kashanaya bulshada caalamka u qabteen Soomaalida, sida oo kale ma noqon kuwo miro dhal ah..

Sida ay ahaataba, sanadki 2008, waxaa mar kale indhaha bulshada caalamka soo jiitay Soomaaliya kadib markii kooxo burcad baddeed ah iyo ururo argagixiso ay ku fideen xeebaha Soomaaliya. Taa oo keentay in Golaha Amaanka ee Qaramada Midoobay qaato qaraar lagu xakameynayo burcad baddeednimada Soomaaliya. Kaas oo ugu baqaayo bulshada caalamka in talaabo wadajir ah ay qaataan wax ka qabadka burcad baddeedka Soomaaliya. Taasi waxaa ay keentay in bulshada caalamku qaadaan talaabooyin ka dhan ah burcad baddeedka Soomaaliya iyo in si degdeg ah loogu istaago wax ka qabadka xasillooni daradda ka jirta dhulka. Soomaalidana laga caawiyo halka baahida ugu badani ka jirto ee ah dowlad dhiska iyo nabad ku soo dabbaalidda dalkooda. Madama xasilloonida Soomaaliya lama huraan u tahay in xal waara laga gaaro nabad galyo xummadda iyo cabsida ka taagan marin biyoodka Badweynta Hindiya, Gacan Berbera iyo amniga guud ee Geeska Afrika.

Dhanka kale, waxaa jira aragtiyo iyo danno isdiidan oo dowladdaha dunida iyo dalalka darisku ka leeyihiin Soomaaliya, oo saameyn weyn ku leh geeddi socodka dowlad dhiska iyo xasiloonida amni iyo siyaasad ee Soomaliya. Sidaa darteed ma aha wax qarsoon loolanka u dhaxeeya dalalka dariska, dowladdaha gacanka carbeed iyo galangalka mid kasta ugu jiro sida u saameyn ugu yeelan lahaa siyaasadda Soomaaliya.
Waxaa jiray doodo si xoogana u soo shaac baxay xilligii doorashooyinku ka dhacayeen dowlad goballeedyada gaar ahaan labbadii doorasho ee ka dhacay Koofur Galbeed iyo Jubbaland. Waxaa siyaaba kala duwan loogu eedeyay dowladdaha Kenya iyo Itoobiya oo ciidankoodu ka mid yihiin ciidanka nabad ilaalinta u joogo Soomaali ee Midowga Afrika (Amisom) inay ku lug lahaayeen isku dhacyo iyo is jiid jiid siyaasadeed oo ka dhashay labbadi doorasho ee dhacay Beydhabo iyo Kismaayo.

Waxaa intaa dheer,in u jiro tuhun ah in dowladdaha Gacanka Carbeed ku leeyihiin siyaasadda Soomaaliya. Waxaa sanaddihi ugu dambeyay la hadal haayay in dalalka Qatar iyo Isku taga Emiraatka Carabtu(UAE) oo xurguf siyaasadeed u dhaxeyso ay ku loolamayaan sida ay saameyn ugu yeelan lahaayeen siyaasadda Soomaaliya. Waxaa oo galaangal ka dhex sameeynaya dhinacyada isku hayaa siyaasada iyo taladda Soomaaliya. Isla markana ay galaangal xoogan dhex sameeyaan dhinacyada isku hayaa siyaasadda Soomaaliya. Waxaa la tuhunsan yahay in dowladdahani ay dhaqaale ku bixiyaan sida ay xiriiro gaar gaar ah ula la yeelan lahaayeen maamuladda ka jira Soomaaliya iyo in ay si toos ah u fangareeyaan musharaxiin xariir hoose la leh. Taa oo hagardaacin karta geeddi socodka dowlad dhiska iyo xasiloonida siyaasadeed ee Soomaaliya.

Dhanka kale, waayahaan dambe waxaa soo baxayay aragtiyo kala duwan oo ka imaanaya Soomaalida dhexdeeda, kuwaas oo tibaaxaya in bulshada Caalamku ay ka gaabineysay daddaaladda lagu xoojinayo xasilloonida,nabad galyada iyo demoqaraadiyeynta Soomaaliya. Waxa jira codad isi soo taraya oo ka imaanaya bulshada qeybaheeda kala duwan kana turjumayo dareen kicin lagu sameynayo dadka Soomaaliyeed aragtidooda ku aadan kaalinta bulshada caalamku ku leedahay dowlad dhiska Soomaaliya, iyo sida ay uga fal celiyaan xilliga xasaradaha amma ismariwaaga siyaasadeed ka dhex taagan yahay Soomaalida.Sidaa daraadeed, waxaa laga maarmaan ah in saxiibadda caalmiga ee Soomaaliya ay si taxar ah u eegaan sida siyaasadaha isdiidan ee dibadda u wiiqi karaan geeddi socodka dowlad dhiska Soomaaliya. si la midda, waa in saxiibadda caalamiga ah ee Soomaaliya ay had iyo jeer xoogaga saaraan muujinta dhexdhexaadnimo iyo eex la'aan marka ay rabbaan in ay xal u raadiyaan amuuraha Soomaalida dhexdeeda ah, madama intabadan Soomaalidu leeyihiin dareen fal celineed oo aad u xooggan marka ay timaado kuwa ay uga shakiyaan amma cabsida kaga qabaan in ay ku lug leeyihiin arrimaha dalkooda si aan dhexdhexaad aheyn. Wanaa sababta keeneysa in ay dhegta u raariciyaan dhawaqa iyo falceliska ka yimaada bulshada caalamka ee ku hawlan arrimahooda siyaasadaa iyo kaalinta ay cayaaraan.

Dhanka kale, waa ay jirtaa in ay soo kordhayaan aaminsanaanta Soomaalida in ay ka tashan karaan arrimahooda maasiiriga iyo ayaaha dalkooda. Balse, su'aasha isweydiinta mudan waxay tahay ilaa iyo intee waqti xaadirkaan Soomaalidu ka maarantaa saxiibadeeda caalamka ee gacan ka siinayo dib u dhiska dowladnimadooda. Sida ay muujinayaan daraasadaha la sameeyay iyo ififaalada muuqda waa xaqiiq aan la dafiri karin in Soomaalidu u baahan tahay gacan qabashada bulshada caalamka maanta iyo mustaqbalka dhaw, haddii ay noqon laheyd dhinac dhaqaale, horumarinta hey'addaha aasaaska u ah dowladnimada iyo xalinta khilaafaadka dhexdooda ah ilaa ay Soomaalidu yeeshaan awood ay hanan karaan maamulka arrimahooda siyaasadda dalkooda.

Waxaa tusaal cad u ah, in muddo ku dhaw seddex sanno ay xiriir iyo wadashaqeyn qaran yeelan dowladda federalka iyo dowlad goballeedyada xubint ka ah in bulshada caalamku aheyd buunda kaliya ee isku xirta amma guud ahaan ah koolada isku haysa geeddi socodka nabadda iyo dowlad dhiska Soomaaliya. Sidaa daraadeed, si looga baaqsado dib u dhac ku yimaada horumarka ay Soomaaliya gaartay sanaddihi dambe, waa in bulshada caalamku hubiyaan talaabada ugu haboon ay ka qadanayaan khilaafaadka laxiriira doorashada iyada oo la eegayo nugulnaanta hanaanka siyaasadda,nabad galyada iyo hay'adaha dowladda ee dalka.

## MATAALADA GOBALKA BANAADIR IYO MAQAAMKA MUQDISHU

Federaleynta Soomaaliy waa mid wali qabyo ah, haddii ay ahaan laheyd dhameystirka dastuurka KMG ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, dhismaha maxkamadda dastuurka iyo maxkamddaha kale heer federal iyo dowlad gobaleed. Matalaada gabalka Banaadir iyo meel marin maqam caasimada Soomaaliya waa qabyada ugu weyn ee ka harsan federaleynta Soomaaliya. Dastuurka KMG ah ee Soomaaliya waxuu si cad u qeexayaa in Muqdishu tahay magaala madaxda Jamhuuriyadda Federalka Soomaaliya, isla mar ahaantana maqaamka caasimada ay sharci gaar ah ka soo saarayaan labbada gole ee parlamanka Soomaaliya sida u qeexayo qodobka 9-*aad ee dastuurka KMG ah " Maqaamka magaalo madaxda Federaalka Soomaaliya waxaa go'aan looga gaari doonaa dib u eegidda dastuurka, waxaana sharci gaar ah ka soo saari doono labbada aqal ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya."*

Haddaba, kadib dhismihi dowlad goballeedyada, waxaa jira dhawaaqyo ka imaanayay bulshada ku dhaqan gobalka ay caasimadu ku taal ee Banaadir. Waxaa ay cod dheer iyo hoosaba ku sheegeen in la joogo xilligi la meelmarin lahaa maqaamka caasimada si dadka deggaanku u helaan matalaada siyaasadeed oo toos ah. Intabadan bulshada ku nool gobalka ayaa aaminsan haddii gobalku yeesho maamul madaxbaan oo dadka deggaanku toos u soo doorteen wax ka badali laheyd nabad galyada, adeega bulsho iyo kaabayaasha horumarineed ay u baahan yihiin. Halka u hadda maamulka deggaanku toos u hoos tago dowladda dhexe loona maamulo sida nidam dowlad dhexe ah, wax weyna aan ka badalin nabad galyada,bilicda iyo adeega asaasiga ah ay u baahan yihiin. Balse, taa baddalkeeda ay yihiin canshuur bixiyaal aan laheyn matalaad iyo xaquuq toona. Sidaa awgeed ay doonayaan matalaad siyaasadeed oo toos ah iyo aayo katalintooda sida u qabo dastuurka KMG ah iyo mabadi'da nidamka faderaalku.

Inkasta oo doodaha la xiriira maamul u sameynta iyo meel marinta maqaamka caasimada yihiin kuwo isi soo taraya, haddana doodaha qaar waxay u muuqdaan kuwo la siyaasadeynayo. Waayo, dooda laxariirta maqaamka caasimadda iyo maamuul u sameynteeda waa mid had iyo jeer aad u soo shaac marka u gabaabsiga yahay mudda xilleedka dowladda oo doorashooyinka loo diyaar garoobayo. Tusaale, dowladda hadda muddo xilleedkeedu dhamaanayo waxaa ka mid ahaa arrimaha hortabinta in ay siiso aheyd dhisida maamulka iyo maqaamka caasimadda balse, ma jirin wax muhiimad ah iyo daddaal ah ay galisay marka laga reebo isku day talo iyo ra'yi aroorin ah u ka dhex bilaabay bulshada ku dhaqan caasimad gudoomiyihii gobalka Thabit Abdi. Dad badani ay qabbaan in sababihi u xilka ku wayaya loo aaneynayo isku daygiisi ahaa xal u helida maqaamka caasimadda iyo maamul u sameynteeda madama dowladda federalka ahi dhab ka aheyn meel marinta maqaamka caasimada.

Intaa waxaa dheer, in madaxweynaha Jamhuuriyadda Federalka ah ee Soomaaliya Maxamed Cabdullhai Farmaajo u furitaankii 7aad ee golaha parlamanka Soomaaliya ka codsaday in meel maariyaan talooyinka ay soo jeediyeen guddiga wadjirka ah ee labbada gole ee Parlamanka ee ku aadan matalaada gobalka Banaadir. Inkasta oo siyaasiyiin badani ku tilmaameen in madaxweynuhu ka leeyahay dano siyaasadeed iyo marin habaabin madama dowladiisu ay horey waqti iyo daddaal u galin dhismaha maqaamka caasimadda.

Sida ay ahaataba, guddiga wadjirka ah ee labbada gole waxaa ay horkeeneen golaha shacabka taladooda ku adaan matalaada gobalka Banaadir ku yeelanayo aqalka sare. Kadib markii golahu dhageystay talada guddiga, dood dheerna ka yeeshay, waxaa goluhu cod aqlabiyada ku meel mariyay qaraar ah in gobalka Banaadir ku yeesho matalaad 13 xobnooda golaha aqalka sare. Xeerkaan ayaa ka dhigan in magaalo madaxda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya tahay caasimad dowlad gobaLleed ah(city state) sida Berlin oo kale, madama u xeerka golahu meel mariyay qeexayo magaalo madaxeed leh matalaad maamul gobaleed.

Dhanka kale, waxaa jira doodo laxariira sharciyada qaraarka goluhu meel mariyay oo ka imaanaya siyaasiyiinta iyo dowlad goballeedyada qaarkood. Maamuladda iyo dadka dhaliilsan qaraarka golaha waxay ku doodayaan in qaraarku lid ku yahay Qodobka 72-aad ee dastuurka KMG ah, kaas oo qeexayo in tirida xubanha aqalka sare ku matalayo dowlad gobaleedyada ay ugu badnaan tahay 54 wakiil oo ka imaanaya 18 gobal ee Soomaaliya ka koobneyd ka hor burburkii dowladdii dhexe 1991. Halka dadka qaar ay ku doodayaan in labbada qodob ay isdiidaneyn madama qodobka 54-aad u si toos ah u qeexayo in maqaamka caasimada go'aan ka gaarayaan labbada gole ee parlamanka federalka Soomaaliya. sida daraadeed, qaraarka golaha shacabka codku u qaaday u yahay mid sharci ah sida u qabo qodobka 54-aad KMG ah

Isku soo duub oo, ururada bulshada, siyaasiyiinta iyo indheergaradka Soomaaliyeed waxay qabbaan in ay adkeyn maqaam u sameynta caasimada haddii si dhab ah loo wajaho madama, Soomaaliya aheyn dalka ugu horeyay ee qaata nidam federal ah. Balse, ay jiraan caasimadu badan oo ku yaalo dalal leh nidam federala ah sida: Berlin, Washition DC, Mombai. Sida oo kale, waxaa jira dowladdu Afrikaan ah oo dhawaan qaatay nidaamka federalka, hab dhismeedkooda bulsho iyo sababta qaadashadooda nidaamka federalka u dhaw yaha kan Soomaalida.

Sida ay ahaataba, waxaa hubaal ah in dowladda hadda joogta ay meel marin karto maqaamka caasimada iyo maamul u sameyntiisa iyada oo kaashaneysa dadka deggaanka, si xal looga gaaro dooda muddada dheer soo jiitameysay aasaaskana u ah dhameystirka geeddi socodka dowladnimada iyo federaleynta Soomaaliya.

# NOOCA DOORASHO EE DALKA KA DHICI KARTA IYO HABRAACEEDA.

Soomaaliya waxay si rasmi ah u noqotay Jamhuuriyad Federal ah sanadki 2012, sida ku qeexan qodobka 1aad farqadiisa 1aad ee dastuurka ku meel gaarka ah ee Soomaaliya " Soomaaliya waa Jamhuuriyad federaal ah, leh gobannimo, demoqaraadi ah, oo ku dhisan matalaadda dadweynaha, loo dhan yahay oo ku salaysan nidaamka axsaabta badan iyo caddaalad." marka laga yimaado nidamka jamhuuriyaddu ku dhisan tahay, waxaa sidoo kale qodobkani qeexayaa in maamulka siyaasada loo dhan yahay iyo matalaada siyaasada ay ku timaado nidaamka axsaabta badan si demoqaraadi ah.Barlamaanka jamhuuriyadu waxuu ka kooban yahay labba gole , golaha shacabka iyo golaha aqalka sare .Tiradda xildhibaanada golaha shacabku 275 xubnood oo lagu soo xulay hanaanka awood qeybsiga beelaha 4.5. Halka golaha aqalka sare u ka kooban yahay 54 xubnood oo wakiil ka ah dowlad goballeedyada xubinta ka ah dowladda federalka.

Haddaba, dowladda hadda joogta u muddo xilleedkeedu sii dhamaanayo waxaa looga fadhiyay in ay dalka gaarsiiso doorasho guud oo qof iyo cod. Balse, hadda ma muuqdo ififaale muujinayo in dalka doorasho guud laga qaban karo xilligii loo asteeyay, sida ay ka dhawaajiyeen guddiga madaxabanaan ee doorshooyinka qaranka. Warbixin ay guddigu la wadaageen golaha shacabka, waxay ku sheegeen in doorasho qof iyo cod lagu qaban karo xilli ay ku qayaaseen 13 bil.

Inkasta oo marka la eego xaaladda nabad galyo, siyaasad iyo hawlaha farsamo ee lama huraanka u ah qabsoomida doorasho guud ay muujineyn suurtagalnimada in lagu fulin karo muddada u sheegay guddigu. Waana arrin qalqal iyo hubaal la'aan ku beereysa muwadiniinta Soomaaliyeed iyo daneeyayaasha doorashada xilligaan kala guurka ah.
Haddaba, mar haddii ay suurtagal aheyn in doorashado ku dhacdo xilligi loo asteeyay,dowladda hadda joogtana muddo xilleedkeedu sii dhamaanayo, waxaa laga maarmaan ah in heshiish wadar-ogol ah laga gaaro sida ugu wanaagsan ee loo maareyn karo xilliga kala guurka ah.

Marka la eego muuhiimadda ay u leedahay qaabaynta doorashooyinka ka dhaca dowladdaha nugul iyo bulshooyinka kala qaybsan ama dagaalladu aafeeyee. Halkaas oo tiro badan oo aqoonyahanna ah ay diiradda saareen sida naqshadaynta doorashooyinka ama xaaladaha lagu qabanayo doorashooyinka ay saameyn ugu yeelan karaan guusha ama ku guuldareysigeeda. Tusaale, aqoonyahanno badani waxaa ay qabbaan in nidaamyadda doorashooyinka dhiirrigalinaya siyaasadda loo dhan yahay, wadar-ogol ah in ay yareeneyso halista khilaafaadka siyaasadda iyo doorashooyinka.
Taa bedelkeeda, nidaamyada gaarka ah ee dhiirrigaliya fakarka ' guuleystahu gabi ha qaato', iyo hanaan doorasho oo hal dhinac ah ay sare u qaadaan xasaraddaha siyaasadeed ee horey u jiray iyo khilaafaad cusub oo rabshado horseeda.

SPR-Center marka ay u kuurgasha xaaladda dalku ku sugan yahay iyo baahida loo qabo in dalka ay ka dhacdo dooraasho xilligeeda ku dhacda iyo in la helo nuuc doorasho oo muwadiniinta Soomaaliyeed siin karta fursad ka wanaagsan kuwii hore, dalkana u sii dhaweyn karta in u gaaro doorasho guud oo qof iyo cod.
SPR-CENTER waxaa u soo baxay dalka in dalka laga hirgalin karo hanaan doorasho oo ku saleysan nidamka xisbiyadda iyada oo la xeerinayo heshiiska awood qeybsiga 4.5. Isla markana ay heshiis siyaasadeed si wadajir uga gaareen dowladda federalka, dowlad goballeeydada iyo xisbiyadda siyaasadda.

Nuuca doorashada oo ah 'Doorasho Dadban oo Durugsan', (Promoted Indirect Election). Taa oo macnaheedu yahay in la qaban karo doorasho ka balaaran, kana horumarsan tii 2016, haddii ay ahaan laheyd tiradda codbixyaasha, goobaha ay ka dhaceyso iyo sida looga qeyb galayo iyada oo la dhowrayo heshiiska awood qeybsiga beelaha Soomaaliyeed 4.5 iyo xeerarka doorashada iyo xisbiyada Barlamanka Soomaaliya.
SPR-CENTER waxay gundhig uga dhigtay diraasada iyo soo bandhigitaanka noocaan Doorashada Dadban oo Durugsan iyo habraaceeda:

a) In nooca doorashada ee maanta dalka ku haboon ay tahay mid waqtigeeda kooban ee harsan lagu hirgalin karo, si looga fogaado dib u dhac.

b) In doorasho noqoto mid u dhaweyneysa dalka in u gaaro doorasho guud oo 'qof iyo cod ah' muddo xilleedka kan xigga.

c) In la helo nuuc doorasho siin karta muwaadiniinta Soomaaliyeed fursad ka balaraan tii 2016, qeybna ay ka yihiin dhammaan qeybaha kala duwan ee bulshada, sida dhalinyaradda, haweenka, indhyeergaradka, dhaqanka iyo culma-u-diinka iyada oo la kordhinayo tiradda codbixyaasha.

d) In ay ka dhici karta dhowr xarumood, halka tii 2016 ay ka dhcday xarumaha maamul goballeedyada oo kaliya.

e) In ay tahay mid suurtagalin karta in lagu galo nidaamka axsaabta si ay daah ugu furtoo ka guuritaanka nidamka siyaasadda ku saleysa heybta

## Kaalinta Xisbiyadda ee doorashada 2020/20121

In kabadan nus qarni Soomaaliya kama dhicin doorasho guud oo ku dhisan nidaam axsaabta. Waana riyadda muwadiniinta Soomaaliyeed had iyo jeer ku tamayaan in ay maalin helaan xaqa ay u leeyihiin go'aan ka gaarista aayo katalintooda. Sida u qeexayo qodobka 1-aad, farqadiisa 1aad ee dastuurka ku meel gaarka ah, jamhuriyadda Soomaaliya waa mid dimoqaraadi ah oo ku dhisan matalaada dadweynaha kuna saleysan nidamka axsaabta badan.
Nasiib daro, ma dhicin in la hirgaliyo mabadida gundhiga u ah dowladnimada tan iyo markii ay curatay jamhuriyadda federalka ahi 2012. Sida kale, waxaa ay aheyd waxyaabaha ugu weyn ee hortabinta u lahaa dowladda hadda muddo xilleedkeedu sii dhamaanayo in ay dalka ka hirgaliso.

Hadaba. madama aan la gaari kari higsigi ahaa in dalku ka gudbo nidaamka siyaasadeed ee ku dhisan heybta una guuro nidaamka xisbiyadda badan. Waa muhiim in doorashada ka dhaceyso dalka sanadda 20/21 ay noqoto mid daaha u furta geeddi loogu sii dhawaanayo in dalku gaaro hanaan siyaasadeed oo ku dhisan matalaada dadweynaha kuna imaanaya nidaamka xisbiyadda badan.

Sidaa awgeyd, xisbayaddu waxay kaalin wanaagsan ka qaaadan karaan hanaanka doorashada iyo horumarinta geedi socodka demoqaradiyeenta dalka iyo in la helo hab doorasho oo dalka u sii dhaweyn karta in u gaaro higsiga ah doorasho guud oo qof iyo cod. Waayo, bilowga hirgalinta nidaamka axsaabta badani waxuu dhabiga u sii xaarayaa in dalku ka guuro siyaasadda ku dhisan heybta oo u gudubo nidaamka siyaasada loo dhan yahay. Sida oo kale, xisbiyadu waxaa ay qeyb weyn ka qaadanayaan hoos u dhiga xiisadaha laxariira loolanka siyaasadda ee beelaha dhexdooda ah madama ay meel iskugu soo arooorinayaan aragtiyada iyo danaha bulshada qeybaheeda kala duwan.

Waxaa intaa sii dheer, in xisbiyadu ay lama huraan u yihiin meel marinta labba qodob oo laf dhabar u ah sugnaanta iyo habsami u socodka doorashada oo ah :

a. Meel marinta qoondada haweynka madama ay dhaqan ahaan adag tahay in si hufan beelaha looga hirgaliyo beelaha dhexdooda. Balse, taa badalkeeda ay axsaabta siyaasadu dajin karaan ajanda ah in xubnohooda u tartamay kuraasta ay 30% ka dhigaan haween.

b. Hubinta iyo sugidda qofnimadda iyo heybta musharaxa u taagin in u ka mid noqdo golayaasha paralamanka. Tusaale ahaan, halka qof kali socdo isku soo taagi lahaa jago ay ka haboon tahay in u yahay qof xubin ka ah hey'ad dowliya oo tixraac leh. Taa oo dowr weyn ka qaadaneysa yareynta musuqmaasuq iyo suurtagalnima in kooxo xagjir ah qeyb ka noqdaan golayaasha Parlamanka.

## Kaalinta Guddiga Madaxabanaan ee Doorashooyinka Qaranka:

Waxaa nus qarni kadib, dib loo aasaasay Guddiga Madaxbanaan ee Doorashooyinka Qaranka sanadkii 2015, si u dalka iyo dadka ugu diyaariyo doorashooyin guud oo qof iyo cod ah. Guddigu waxaa lagu dhisay xeerka guddiyadda madaxbanaan iyo xeerka guddiga oo soo baxay 20015. Sida u qeexayo xeerku xubnaha Guddigu Madaxabanaan ee Doorashooyinka Qaranka, waxaa ay mas'uul ka yihiin maamulidda dhammaan doorashooyinka dalka. Hase yeeshe, ma jirin kaalin muuqato uu guddigu ku lahaa doorashooyinki ka dhacay dalka haddii ay ahaan laheyd doorashooyinka qaran ee 2016 iyo kuwa sanaddahii la soo dhaafay ka dhacay dowlad goballeedyada. Inkasta oo aad looga han weynaa in guddigu kaalin mug leh ka qaadan doono ka hirgalinta doorasho qof iyo cod dalka sanadda 20/21.

Dhanka kale, ma muuqato hufnaan iyo halw muuqdo u guddigu ka sameeyay hawsha loo igmaday. Marka laga yimaado arrimaha u baahan heshiish siyaasadeed, guddigu wax kama qaban hawlaha farsamo muhiimka u ah doorashada sida diiwaan galinta cod bixiyaasha iyo wacyi galintooda. Sida oo kale, waxaa jira kalsooni dari ay ka qabbaan axsaabta siyaasadda iyo maamul goballeedyadu dhexdhexaadnima, eex la'aanta iyo hufnaanta guddiga. Taa oo wiiqeyso jiritaanka guddiga iyo sharciyadiisa madama ay jirin kalsooni guud oo lagu qabo u tala saarashada guddiga maamulka doorashooyinka.
Arrinta ah ku kalsoonaan la'aanta hey'addaha madaxabanaan ee dowladda Soomaaliya dhexdeeda, waa mid salka ku heysa nugulnaanta hey'addaha, musuqmaasuqa baahsan, awood ku tagri falka iyo nin jecelysiga ku dhisan danaha qofeed iyo midka siyaasadda.

Sida ay ahaataba, si xal looga gaaro maamulka doorashooyinka 20/21, waxaa lama huraan ah in la qaato labba wadiiqadood middood:

I. In la dhiso guddi doorasho oo ku meel gaar ah, oo ay ka wada shaqeynayaan dowlad dhexe, dowlad goballeedyada iyo wakiilo ka socda xisbiyadda.

II. In guddiga madaxabaanan ee doorashooyinka qaranka ee hadda joogo dib habeen lagu sameeyo. Sida in lagu kordhiyo wakiilo ka socoda maamul goballeedyada, xisbiyadda iyo goob joogayaal caalami ah oo hawshooda kormeera. Isla markana la hubiyo in guddigu ku shaqeeyo xarun ka baxsan xeyndaabka hey'addaha dowladda.

## Shaxda iyo habraaca guud ee doorashada 2020/2021

Habraaca loo marayo doorashooyinka 2020/2021, waa:

a) In tirada cod bixyaasha noqoto 151 xubnood oo ka kala imaanaya bulshada qeybaheeda kal duwan, sidaa odey dhaqameeydada,culumuda, dhalinyaradda iyo haweenka. Isla markana cod bixyaasho ay yihiin kuwo ka soo jeedo deggaan doorashada kursiga lagu tartamayo.

b) In doorashadu ka dhacdo ugu yaraan hal degmo oo kamidda goballada ay dowlad goballeedka kastaahi ka kooban tahay.

c) In tartanka kuraasta lagu galayo u noqdo nidaamka xisbiyadda badan iyada oo la xeerinayo awood qeybsiga beelaha Soomaaliyeed 4.5. Taa oo macnaheedu yahaay in halkii qof kaliya kula tartamayay qof kale kurisi iyo matalaada beel/deggaan doorasho in badalkeeda ay noqoto murashax ka tirsan urur siyaasadeed u la tartamo murashax kale oo ka tirsan urur siyaasadeed kale

d) Halka wakiiladda aqalka sare ku matalayo dowlad goballeedyada ay toos u soo dirsanayaan dowlad goballeedyadu. Haddii ay ahaan laheyd in si toos ah u soo xullaan madaxda dowlad goballeedyada amma ay hab codeyn ah ay ku soo xullaan golayaasha barlamaanadda dowlad goballeedyada.

## Shaxda deggaanmeynta kuraasta doorashada 2020/2021

| Dowlad goballeedka | Xarunta | Saamiga golaha shacabka | Saamiga aqalka sare |
|---|---|---|---|
| Koofur-galbeed | Beydhabo, Diinsoor, Marka | 69 kursi | 8 |
| Goballadda-waqooyi /Somaliland | Mogadishu | 46 kursi | 9 |
| Jubbaland | Kismaayo, Garbahaarey, | 43 kursi | 8 |
| Hirshabelle | Jowhar Beledweyn | 37 kursi | 8 |
| Puntland | Garowe Boosaaso | 37 kursi | 11 |
| Galmudug | Dhuusamareb Hobyo | 36 kursi | 8 |
| Banaadir | Moqadishu | 7 kursi | 13? |
| Wadarta | | 275 | 54/67? |

Sida ku qeexan shaxda kore, doorashada 2020/2021 waxaa ay ka dhici kartaa 12 degmo /xarun doorasho oo ay cod ka dhiibanayaan 41525=(275*151) muwadiniin ah oo ka koobaan dhammaan bulshada qeybaheed kala duwan.
*FG: Haddii ay suurtagal aheyn in gobalo ama degmooyin ka tirsan dowlad goballeedyada la geeyo kuraastooda deggaan doorasho sababa amni amma daruufo siyaasadeed aawadood, waxaa lageynayaa xarunta dowlad goballeedka.*